

DIB XIRIIRINTA GALBEEDKA SEATTLE (RECONNECT WEST SEATTLE)

Warbixinta Codaynta Xaafada - Dhabarka

South Park, Georgetown, Highland Park, South Delridge, Riverview iyo Roxhill

Waanu u
mahadnaqaynaa

kumanaanka ruux ee buuxiyay xog uruurinta ee codeeyay Julaay si ay noogu sheegaan mashruuca ay tahay in aanu dhisno si aanu si dhaanta ugu maamulno saamaynta socodka gaadiidka iyo caqabadaha socodka uu keenayo xidhitaanka Biriishka Dheer ee Galbeedka Seattle. Fikirka aad ka dhiibatay waxay naga caawisay in aanu mudnaan kala siino mashaariicda xaafada oo naga caawin doona in aanu kordhino isku socodka gaadiidka oo aanu u homarino amaanka dadka lugaynaya ee aaga ugu saamaynta badan.

Maxaa Xiga?

2020

Dhimaha 23 mashruuc oo bulshada mudnaan u ah ama ficitada lagu hormarinayo isku socodka iyo amaanka.

2020-2021

- Dhaqan gelinta Barnaamijka Aaga Guryaha (Home Zone Program) ee xaafadaha si loogu bixiyo si amaan ah iyo dadaalka yaraynta xawaaraha.
- Maalgelinta hore oo ah \$6 milyan oo mashaariicda xaafada laga dhaqan geliyay ah.

2021


Bilawga hormarinta mashruuca oo ah 32 mashruuc ama barnaamij oo la hirgelinayo.

Wixii macluumaad dheeraad ah, oo ku saabsan faahfaahinta mashaariicda xaafadaada, fadlan booqo www.seattle.gov/reconnectwestseattle.

Maxaa Dib Loogu Xiriirinayaa Galbeedka Seattle?

Galbeedka Seattle waxaa u muuqda sida lagu gaadhayo dib u xiriirinta xaafadaha Galbeedka Seattle oo ay isku mid tahay u socdaalkoodu ee dhamaan Duwamish ee kuwa la eegey kahor xiritaanka Biriishka Dheer, iyada oo sidoo kale la yaraynayo habaynta deegaanka ee saamaynta bulshooyinka Duwamish Valley.

Waxaa kamid ah dadaalka balaaran ee lagu gaarayo himiladaas, Julaay 10, 2020, Waaxda Gaadiidka Seattle (Seattle Department of Transportation, SDOT) waxay bilawday laba dadaal oo lagula shaqaynayo bulshada: **Codaynta Nidaamka Mudnaanta Xaafada (Neighborhood Prioritization Process Ballots)** iyo **Xog Uruurinta Dib u Xiriirinta Galbeedka Seattle (Reconnect West Seattle Survey)**. Nidaamyadu waxay furan yihiin ilaa Julaay 31, 2020.



WAXA AAD NOO SHEEGTEY



15,180 jawaabood oo **Xog Uruurinta Dib u Xiriirinta Galbeedka Seattle** ah
1,750 jawaabood oo **Codaynta Nimddaaka Mudnaan Siinta Xaafada** ah

(Highland Park, Riverview, S. Delridge, Roxhill: 1,074; Georgetown: 209; South Park: 398; SODO: 69).

Macluumaadka Mashruuca iyo Xiriirka

www.seattle.gov/reconnectwestseattle

limeel: westseattlebridge@seattle.gov | Taleefan: (206) 400-7511



Seattle
Department of
Transportation

Barnaamijka Nidaamka Mudnaanta Xaafada (Neighborhood Prioritization Process Themes)

Dadka buuxinaya codaynta saadaasha socodka gaadiidka xaafada waxay noo sheegeen inay walaac ka qabaan:



Gaadiidka & Saxmada



Amaanka Lugta & Helitaanka



Xawaaraha



Saamaynta Deegaanka & Wasakhda

Xaafad kastaa waxay leedahay caqabad gaar ah iyo mushkilado. Dhamaan xaafadaha waxay u baahan yihiin dejinta isku socodka gaadiidka oo dheeraad ah, mashaariic iyo ikhtiraac. Bulsho kastaa waxay leedahay fikiro dheeraad ah iyo xal ay kaga jawaabayso saamaynta jidka la marayo ee leexanaya.

Barnaamijka Xog Uruurinta Dib u Xiriirinta Galbeedka Seattle (Reconnect West Seattle Survey Themes)

Dadka galaya Xog Uruurinta Dib u Xiriirinta Galbeedka Seattle waxay noo sheegaan in:



Safarada socdaalka kalida ah iyo ku shaqaynta guriga wadaagista bartilmaameed ee la gaadhi karo.



Safarada socdaalka kaliya waxa ay kordhi doonaan 36% qaab la wadaago kadib marka la kala fogaado (2021 Yoolka: 35%).



In guriga laga soo shaqeeyaa waxay noqon doonaa 23% qaabka wadaagista (2021 Yoolka: 10%) oo muujinaysa inay dadku doonayaan inay sii wadaan ka shaqaynta guriga in waxoogaa ah kala fogaanshaha dadku marka ay dhamaato.



Baaskiilka iyo doonyaha tagaasida ah ee la wadaago waxay muujinaysaa korodh 6% mid kasta, laakiin waxaa ka xishooda 10% qaabka wadaagista yoolka 2021.



Socdaalayaasha waxaa la filnayaa in isticmaalkooda basku yaraado si wayn (laga bilaabo 17% wixii ka horeeya kala fogaanshaha dadka ilaa 11% wixii ka danbeeya kala fogaanshaha). Yoolkeena 2021 ee wadaagista basta waxa uu yahay 30%, oo muujinaysa fursad hormarin iyo saamaynta ka iman karta safmarka wakhtigan ee aragtida mustaqbalka ee tareen isticmaalka.



Kororka rabitaanka carpool, vanpool, gaadiidka shaqaalaha marka ay dhamaato kala fogaanshaha dadku.

Isku Xirnaanta

Inta lagu jiro nidaamkan, waxa aanu kugala socodsiin doonaa mashaariicda soo socota:

- Macluumaad sadex biloodle ah oo xaalada mashruuca ah (waxa aanu dhisnay, nashqada iyo fursadaha soo socda)
- Macluumaad la isku siiyo iimeel, websaytka iyo baraha bulshada inta aanu dhisayno mashruuca ama u baahan macluumaadkaaga
- In la wadaago macluumaadka ugu danbeeya si joogto ah oo la uruuriyo fikirada ku saaban meesha uu marayo mashruucu hay'ada bulshada, munaasabadaha bulshada iyo kulmada dhaxdooda
- La shaqaynta Waaxda Barnaamijka Wakiilada Bulshada Xaafada si ay ula socdaan oo ay ula shaqeeyaan bulshooyinka/luuqadaha Isbaanishka, Khmer, Somali, Vietnamese, Oromo, Korean iyo Chinese

Dib u Xiriirinta Galbeedka Seattle way ka badan tahay liis mashaariic. Waxaa weeye wada xaajood joogto ah oo u dhaxeeya SDOT iyo bulshada oo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee aanu u maarayn karno caqabada socodka gaadiidka iyo isku socodka.